

# Heerarka Tayada Horumarinta ee Aqoonta Barbaariyaasha Caruurta



Horumarinta Aqoontu waxay caawinaya guusha barnaamijka ee meelaha tayada oo dhan. Washington State Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Gobolka Washington, DCYF) waxay abaalmarinaysaa nidaamka aqoonsiga Early Achievers ee ku salaysan macluumaadka Diwaangalinta Shaqaalah (MERIT) ee ku saabsan shaqaalah ka shaqaynaya goobta.



## DHIBCAHA JAANTUUSKA

Barnaamijyadu waxay helayaan ilaa 10 dhibcood. Dhamaan wadarta dhibcaha liistaysan waa daroojoyinka early childhood education (waxbarashada barbaariinta caruurta, ECE), ama wax la xidhiidha, ama wax u dhigma oo la aqoonsanyahay ee dhibcaha Horumarinta Aqoonta Early Achievers.

**CUSUB:** Nidaamka Aqoonsiga Tayda ee Early Achievers hada wuxuu aqoonsaday heerarka dhamaaday kuwasoo aan ku jirin ECE ama meelaha la xidhiidha. Wuxaan tirinaynaa heerarka dhibcaha ee heerka ka hooseeyya ECE.

## Xarumaha Daryeelka Cunuga ee Dhibcaha Koriinka Aqoonta

Heerka Tayada	Shuruuda Heerka Tayada	Dhibco
<b>AGAASIMAH</b> Agaasimaha xarunta ama kormeeraha ayaa leh waxbarasho u qalanta oo lagu xaqiijiy MERIT. Tirada dhibcaha la helay waxay ku saleysan tahay heerka waxbarashada ugu sareeya ee uu gaaray Agaasimaha, Kalkaaliyaha Agaasimaha, Kormeeraha Barnaamijka, Xiriirka/Maareeyaha Goobta Barnaamijka Garab Qabashada, ama Xiriirka/Maareeyaha Goobta ECEAP.	Agaasimaha ama Kaaliyaha Agaasimaha ayaa buuxiyay mid kamid ah shuruudahan soo socda: <ul style="list-style-type: none"> <li>• <b>1 dhobic:</b> ECE shahaadada gobolka ama u wax dhigma</li> <li>• <b>2 dhibcood:</b> AA dhanka ECE ama wax u dhigma</li> <li>• <b>3 dhibcood:</b> BA dhanka ECE ama qeyb la xiriirta</li> <li>• <b>4 dhibcood:</b> MA ama ECE sare ama qeyb la xiriirta</li> </ul>	4
<b>SHAQAALAH WAXBARASHADA</b> Hogaanka iyo kalkaaliyaasha macalimiinta' ee xarunta ayaa leh waxbarasho u qalanta oo lagu xaqiijiy MERIT. Tirada dhibcaha la helay waxay ku saleysan tahay celceliska tirada dhibcaha ay heleen 25% shaqaalah waxbarashada ee heerarka ugu sareeya ee waxbarashada.	Dhibcaha ugu danbeeya waxa go'aamin doona celceliska tirada dhibcaha ay heleen 25% ugu sareeye shaqaalah waxbarashada: <ul style="list-style-type: none"> <li>• <b>2 dhibcood:</b> Shahaadada koobaad ama wax u dhigma</li> <li>• <b>3 dhibcood:</b> Shahaadada kooban ama wax u dhigma</li> <li>• <b>4 dhibcood:</b> Shahaadada gobolka ama wax u dhigma</li> <li>• <b>5 dhibcood:</b> AA dhanka ECE ama wax u dhigma</li> <li>• <b>6 dhibcood:</b> BA ama ECE sare ama wax u dhigma</li> </ul>	6
<b>WADARTA DHIBCAHA SUUROGALKA AH EE HORUMARINTA AQOONTA (XARUNTA)</b>		10

\*Loo asteyay **Hogaamiye Kasta ama Kaaliyaha Macalinka** doorka MERIT oo ay kujiraan: Xarunta, ECEAP, Early ECEAP (Hore ECEAP), Head Start (Madaxa Bilaabista), ama Early Head Start (Madaxa Bilaabista Hore)



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

## Dhibcaha Horumarinta Aqoonta ee Qoyska Guriga Daryeelka cunuga

Heerka Tayada	Shuruuda Heerka Tayada	Dhibco
Baraha guriga qoyska xanaanada cunugga qoyska ama shaqaalaha aasaasiga ah ayaa leh waxbarasho u qalanta oo lagu xaqiijiyay MERIT. Tirada dhibcaha la helay waxay ku saleysan tahay heerka ugu sareeya ee waxbarashada ay heleen Guriga Qoyska Liisan-haysta Daryeelka Cunuga Qoyska Guriga, Adeeg-bixiyaha, Xaqlaha, ama Shaqaalaha Koobaad.	<p>Shaqaalaha Asaasiga ah ee Daryeelka Cunuga Qoyska Guriga waxay buuxiyeen mid kamid ah shuruudahan soo socda:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• <b>2 dhibcood:</b> Shahaadada koobaad ama wax u dhigma</li> <li>• <b>3 dhibcood:</b> Shahaadada kooban ama wax u dhigma</li> <li>• <b>4 dhibcood:</b> Shahaadada gobolka ama wax u dhigma</li> <li>• <b>6 dhibcood:</b> AA dhanka ECE ama wax u dhigma</li> <li>• <b>8 dhibcood:</b> BA dhanka ECE ama qeyb la xiriirta</li> <li>• <b>10 dhibcood:</b> MA ama ECE sare ama wax la xidhiidha</li> </ul>	10

### WADARTA DHIBCAHA SUUROGALKA AH EE HORUMARINTA AQOONTA (GURIGA QOYSKA)

10

## Doorarka Shaqalaha iyo Noocyada Barnaamijyada

**Dhamaan Barnaamijyada** waa inay xaqijiyaan shaqaalaha hada ee macluumaadka shaqaalaysiinta MERIT.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ama cusboonaysiinta diwaanada shaqaalaysiinta aad ka heli kartaa wabsaaytka DCYF [www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-profdev/merit](http://www.dcyf.wa.gov/services/earlylearning-profdev/merit).

**Barnaamijyada Daryeelka Cunuga ee Guriga Qoyska** waxay heli karaan ilaa 10 dhibcood oo ah heerka ugu sareeya waxbarashada uu kasbaday xubin shaqaalaha ee kujira doorka Liisanka Daryeelka Cunuga ee Guriga Qoyska, Bixiyaha, Mulkiilaha, ama Shaqaalaha Asaasiga ah.

**Barnaamijyada Xarunta Daryeelka Cunuga** waxay heli kartaa ilaa 10 dhibcood oo ku salaysan sidan soo socota:

- Ilaa afar dhibcood heerka ugu sareeya ee waxbarashada uu kasbado xubin ka tirsan shaqaalaha hoggaanka doorka Agaasime, Kaaliyaha Agaasimaha, Kormeeraha Barnaamijka, Xiriirka/Maareeyaha Goobta Barnaamijka Garab Qabashada, ama Xiriirka/Maareeyaha Goobta ECEAP.
- Ilaa lix dhibcood oo xarunta waxbarashada shaqaalaha. DCYF ayaa go'aamisa iyadoo xisaabinaya celceliska tirada dhibcaha ay kasbadeen 25% ee shaqaalaha waxbarashada (macalimiinta hormuudka ah iyo kaaliyeasha macalimiinta) ee leh heerarka waxbarashada ugu sareeya.

## Xaqijinta Waxbarashada

Fadlan hubi diwaanada waxbarashada shaqaalaha hada iyo kuwa hore loo xaqiijyay. DCYF waxay ku talinaysaa in hawshan la kala hormariyo goor hore Wareegga Aqoonsiga Tayada si loo ogolaado wakhti ku filan xaqijinta.

## Waa maxay Shahaadooyinka iyo Ku haboonaanshaha La Ansixiyay?

- Si aad u ogaato wax ku saabsan shahaadooyinka iyo ku haboonaanshaha in la aqbalay, dib u eeg daabacaadaha Jaantuska *Equivalent Options for Education chart (Doorashooyinka Waxbarashada u Dhigma, EPS\_0037)* waxa lagu heli karaa si onlaayn ah [www.dcyf.wa.gov/publications-library/EPS\\_0037](http://www.dcyf.wa.gov/publications-library/EPS_0037).
- Si aad wax badan uga ogaato shahaadooyinka loo tixgaliyo inay ku jiraan ECE iyo kuwa la xidhiidha, dib u eeg Hagaha Aqoonsiga Kaduwan ee laga heli karo onlaaynka [www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/AlternativeCredentialGuide.pdf](http://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/AlternativeCredentialGuide.pdf).



## SU'AALO?

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan waxbarashada iyo xaqijinta shaqaalaha, fadlan la xidhiidh bushqada MERIT [merit@dcyf.wa.gov](mailto:merit@dcyf.wa.gov).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xisaabinta dhobicda Early Achievers PD, fadlan la xidhiidh QRIS bushqada [QRIS@dcyf.wa.gov](mailto:QRIS@dcyf.wa.gov).

## Xisaabinta Muunada ah

### Daryeelka Cunuga ee Guriga Qoyska

Dhibcaha horumarinta aqoonta ee barnaamijaya daryeelka cunuga ee guriga qoyska waxa go'aamiya heerka aqoonta ee mulkiilaha ama shaqaalaha asasiga ah. Family Home Child Care (Mulkiilaha aryeeelka cunuga ee Guriga Qoyska) waxa uu haystaa BA laakiin shahaadadu kuma taal ECE, markaa waxay heli doonaan 6 dhibcood PD.

Sababtoo ah mulkiilaha daryeelka cunuga ee guriga qoyska wuxu haystaa BA aan ku jirin ECE ama wax la xidhiidha, waxay heleen 6 kamida dhibcaha Horumarinta Xirfadlaha, ama wax u dhigma AA kujira ECE.

6  
DHIBCOOD  
↓  
6  
DHIBCOOD

Mulkiilaha Daryeelka Cunuga ee Guriga Qoyska BA aan kujirin ECE  
WADARTA DHIBCAHA PD EE DARYEELKA CUNUGA EE GURIGA QOYSKA

### Xarunta Daryeelka Cunuga

#### Hogaaminta

Xaruntu waxay leedahay Agaasime iyo Kaaliye Agaasime. Agaasimuhu wuxuu leeyahay heerka ugu sarreeya ee waxbarashada, sidaas darteed xaruntan waxay heli doontaa dhibcaha 3 ee waxbarashada hoggaaminta.

3  
DHIBCOOD Agaasimaha Xarunta BA kujira ECE 2  
DHIBCOOD Kaaliyaha Agaasimaha BA aan kujirin ECE  
↓  
3  
DHIBCOOD WADARTA DHIBCAHA HOGAAMINTA

#### Shaqaalaha Waxbarashada

DCYF ayaa go'aamisa dhibcaha horumarinta xirfadeed ee shaqaalaha xarunta iyada oo xisaabinaya celceliska tirada dhibcaha ay kasbadeen 25% ee shaqaalaha waxbarashada (macalimiinta hormuudka ah iyo kaaliyeyaasha macalimiinta) ee leh heerarka waxbarashada ugu sarreeya.

Xaruntan waxay leedahay 11 shaqaalaha waxbarashada ah. 25% kamid ah 11 waa 2.75, ama 2, macalin. DCYF waxay doorataa labada macalin iyadoo ku saleysa heerka ugu sarreeya ee waxbarashada la kasbaday.

2  
DHIBCOOD Kaaliyaha Shahaadada Hore 2  
DHIBCOOD Kaaliyaha Shahaadada Hore 2  
DHIBCOOD Kaaliyaha Shahaadada Hore  
2  
DHIBCOOD Kaaliyaha Shahaadada Hore 3  
DHIBCOOD Kaaliyaha Shahaado Muddo Gaaban 3  
DHIBCOOD Kaaliyaha Shahaado Muddo Gaaban  
4  
DHIBCOOD Hogaanka Macalimiinta Shahaado Muddo Gaaban 4  
DHIBCOOD Hogaanka Macalimiinta Shahaado Muddo Gaaban 4  
DHIBCOOD Hogaanka Macalimiinta AA aan kujirin ECE  
5  
DHIBCOOD Hogaanka Macalimiinta AA kujira ECE 6  
DHIBCOOD Hogaanka Macalimiinta BA kujira ECE

25% Sare ee Shaqaalaha Waxbarashada

Labada shaqaalee haysta tirada ugu badan ee dhibcaha ay heleen 5 dhibcood AA ee kujira ECE iyo 6 dhibcood BA ee kujira ECE.

5  
DHIBCOOD Hogaanka Macalimiinta AA kujira ECE 6  
DHIBCOOD Hogaanka Macalimiinta BA kujira ECE

Dhibcahaan ayaa celcelis ahaan gaaraya 5.5 dhibcood, kuwaas oo heli doona dhibco 6 dhibcood shaqaalaha waxbarashada.

6  
DHIBCOOD WADARTA DHIBCAHA SHAQAALAHAA WAXBARASHADA

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafso jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybah) 1-800-723-4831 ama iimayl [communications@dcyf.wa.gov](mailto:communications@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION EL\_0047 SM (10-2022) Somali